


Soo koobitaanka Fiidiyowga

Waa Maxay Soo koobitaanka Fiidiyowga?



Soo koobitaanka Fiidiyowga waa hab lagu qorsheynayo cashir ama hawl, laqabanayo cashirka ama hawsha (iyadoo isla mar ahaantaana la duubayo), oona lasoo bandhigayo sida cashirka ama hawshu udhacday.


Ujeedka Soo koobitaanka Fiidiyowga waxay tahay:

- Aqoonsiga kartida iyo fursadaha koritaanka
- Horumarinta iska-tarjumida nafsiga ah iyadoo la isticmaalayo xogta
- Fududeynta dadaalo joogta ah oo kor loogu qaadayo tayada

Maxay muhiim u tahay Soo koobitaanka Fiidiyowga?

Soo koobitaanka Fiidiyowga waa hab kusaleysan kartida si kor loogu qaado tayada deegaanka waxbarashada hore ee ubadka iyadoo hoggaanka loo dhiibayo Early Learning Professionals (Xirfadlayaasha Waxbarashada Hore ee Ubadka, ELP). Soo koobitaanka Fiidiyowga waxay xusaan barnaamijyada kujira safarkooda horumarinta xirfada isla markaana iyadoo la aqoonsanayo shaqo tayadeedu sarreyso si loogu taageero horumarin joogto ah iyo waxbarasho nolosha oo dhan ah.

Soo koobitaanka Fiidiyowga wuxuu u oggolaanayaa ELP inay soo duubaan isdhexgallada tayada sare leh ee kajira deegaankooda waxbarashada hore ee ubadka. Iyadoo la isticmaalayo tiknoolajiyada, ELP ayaa soo bandhigi doona tilmaamaha waxbarashada hore ee ubadka ee lagu dhaqmo waxayna u gudbin doonaan muuqaaladaan si dib u eegis loogu sameeyo oo kor loogu sii qaado tayada waxbarashada ee deegaanadooda iyo waxbarashada ubadka kudhaqan Gobolka Washington.



Maxaa la isaga baahan yahay si loo aqbaloo Soo koobitaanka Fiidiyowga?

- Hal muuqaal oo laga soo qaaday fasal kasta/deegaan kasta oo waxbarasho ee barnaamijka in lasoo gudbiyey
- Fiidiyow kasta si macquul ah inuu u arki kar Quality Recognition Specialist (Khabiirka Aqoonsiga Tayada, QRS)
- Fiidiyow kasta inuu leeyahay cod kufilan si uu QRS u maqlo waxa dhacaya
- Fiidiyow kasta inuu u dhexeeyaa 10-15 daqiiqo
- Dib u milicsi in fiidiyow kasta lagu dhammeystiraa
- Macalinka horjoogaha ah iyo ugu yaraan hal goob oo daryeelka carruurta ah inay kujiraan fiidiyowga

Maxaa dhacaya marka xigta?

Fiidiyowiyada iyo dib u milicsiyada waxaa dib u eegis kusameeya QRS la isku halleyn karo oo ka imaanaya Cultivate Learning ee Jaamacadda Washington. QRS ayaa adeegsan doona aaladda QUIC si uu u qiimeeyo fiidiyowga oo uuna u soosaaro jawaabcelin. Warbixin ayaa lasiiyaa macalin kasta oo horjooge ah iyo/ama milkiilaha daryeelka carruurta ee guriga qoyska si loogu isticmaalo tababaridda iyo dadaalada tayada kor loogu qaadayo. Barnaamijyada ayaa hela 5 dhibcood markasta oo ay soo dhammeystiraan habkan ilaa 6 jeer. Fasalada gaaray da'da iskuulka ayaa sidoo kale kaqeyb qaadan kara. Ka hubi tababarahaaga si aad ooga ogaatid waxbadan oo kusaabsan sida fasalada gaaray da'da iskuulka ay ooga qeybqaadan karaan Soo koobitaanka Fiidiyowga.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhaha Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EPS_0082 SM (08-2022) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES